The Children's Aid Society of Ottawa | La Société de l aide à l'enfance d'Ottawa

Maxaa dhaca marka aan la-soo xidhiidho/Xiriiriyo (HDC)?

Heya'dda Daryeelka Caruurtu (HDC) waxay darsi macluumaad kii aad siisay si ay u hubiyaan in uu baadhitaan u baahanyahay. Shaqaalaha HDC waxay u-xilsaaranyihiin awoodna u hystaan in ay baadhaan tuhumada, ilaaliyaana nabadgalyada carruurta. Shaqaalaha waxaa lagayaaba in ay kaashadaan boliska iyo heya'daha kale ee beesha; iyada oy ay ka mid tahay baadhitaanka iyo qorshaha nabadgelyada carruurta.

Waa maxay qarsoodigu? Macluumaadka la xidhiidha dadka aan u adeegnaa waa qarsoodi. HDC waxay macluumaadkaaga cid ubandhigi kartaa marka aad qoraal ogolaasho ah bixisid. Hadii loo baahdo macluumaad si loo qorshayo nabadgalyada ilmaha waxaan ka soo qaadanaa rukhsad-maxkamadeed si aan macluumaadka u helo. Macluumaadka qarsoodiga ah ee ku saabsan xaalad hortaal maxkamadda waxaa loo bandhigaa Xaakinka Maxkamadda Qoyska.

Maxaa la keydiyaa? Dawladda gobalku waxay ka rabtaa HDC qoraal ay ku keydiso xidhiidhka aan la yeelano carruurta iyo qoysaska. Keydkaa qoraalka ah waxaa ku diiwaangashan wixii macluumaad ah ee la xidhiidha go'aamadii la qaatay iyo adeegyada loo fidiyey carruurta iyo qoysaska. Rikoodhku waa qarsoodi ilaa ogolaasho la heysto ama loogu baahdo hawl maxkamadeed.

Bolisku miyay marnaba dhexgalaan xaaladaha la-xidhiidha badbaadinta ilmaha? Xaaladaha halista ah ee jidh garaaca, ku-xadgudubka galmada ama daayicidda waxaa loo gudbiyaa boliska. Bolisku dambi ayay ku soo oogaan qofka hadii macluumaadku sheegayo in fal dambiyeed la sameeyay.

Ilmo miyaa la wareystaa? Marka shiki ama war taxadir leh oo ku saabsan ilmo ama dhalin ay soo gaadho HDC waxaa la sameeyaa waraysi. Sida badan waraysi wuxuu dhacaa marka ay waalidku ogolaadaan. Xaaladaha aad u halista ah, HDC waxay wareysataa ilmaha iyada oo aan ogolaasho ka qaadan walidiinta ogeysiina.

Goorma ayay aqoonyahanada caafimaadku soo dhex galaan? Marka la tuhmo ama ay ku dhacdo ilmo ama dhalin ku-xadgudub ama daayicid xumi. Waxaa loo baahan karaa in baadhitaan caafimaad la sameeyo. Inta badan marka uusan jirin waalid u ogolaan kara HDC sida uu dhigayo Xeerka Adeegyada Ilmaha iyo Qosku, waxay si ku-meel gaadha ah u haynayaan ilmaha si loogu sameeyo baadhitaan caafimaad. Waxaa lagu dadaala in lala soo-hadlo, lagana qeyb-geliyo waalidinta.

Maxay Tahay Heya'dda Daryeelka Carruurtu (HDC)?

Hey'adda Daryeelka Carruurta ee Ottawa (HDC) waa urur bulsho oo si sharci ah ugu xilsaaran in ay ka ilaaliso carruurta iyo dhalinyarada xadgudubka iyo daayacnaanta.

Waxaan ka mid nahay 53 urur oo reer Ontario ah oo ilaaliya nabadgalyada carruurta, una fidiya gargaar iyo adeegyo kale waalidiinta, markii loo baahdona waxaan u fidinaa nabadgalyo, barbaarin iyo daryeel carruurta iyo dhalinyarada aan ku noolaan karin guryahooga dhibaatooyin qoys awgeed.

Waxaan fidinaa 24 saacadood adeeg ah todobada malmood ee sitimaanka.
Wakhtiga ka baxsan saacada shaqada, waxaa jirta koox shaqaale ah oo heegan u ah ka badbaadinta carruurta xaaladaha ay khatar ku sugnaan karan.

Badiyaaba waxaa noo suurtagala inaan ilaalino carruurta iyaga oo weli ku nool guryahooga.

Waxaan iskaashanaa qoysaska iyo xubnaha kale ee beesha si aan u hubino carruurta iyo dhalinyaradu in ay ku suganyihiin nabadgelyo. Mararka qaarkood ilmaha ama dhalinyarada guryahooga lagagama badbaadin karo waxyeelada khatarta ah. Sidaa darteed waxaa si ku meel-gaadh ah loogu dhiibaa qoys, ama waxa la geeyaa guri-kooxeed lagu wada noolyahay.

Marka ay heya'ddu ilmaha ka mas'uul noqoto waxay ku dadaashaa in ilimuhu la xidhiidho/xiriiro waalidkiisa amaba waalidkeeda markasta oo ay suurtagal noqoto. Inta ay hey'addu ilmaha iyo dhalinyarada mas'uul ka tahay waxaan u fidinaa fursadaha ugu fiican xaga kobcinta iyo korsiinta.

Waxaan ku dadaalnaa inaan fidinno adeegyo ixtiraama midabada, diimaha, luqadaha, jinsiyadaha, awooda iyo dhaqammada kala duwan.

Daryeelka Caruurta ee Ottawa (613) 747-7800

Muxuu yahay daryeelka ilmaha ee ku-meel gaadhka ahi?

Daryeelka ku meel-gaadhka ahi waa marka aad koriso ilmo aanad dhalin oo ay kuu dhiibto Heya'dda Daryeelka Caruurtu muddo dawr maalmood ah, sitimaano ah, bilo ah ama sannad ah.

Waa ayo waalidiinta sida ku- meel gaadhka ah wax u daryeeshaa?
Waalidiinta sida ku- meel gaadhka ah carrurta u koriyaa waa dad ka iman kara jinsiyado, diimo, iyo dhaqammo kala gedisan. Dadkaas oo rumaysan inuu ilmo waliba mudanyahay kalgacal iyo ixtiraam.Waalidinta wax koriyaa waa dad da'doodu ka weyn tahay 18 sanno

oo muujiyey karti waalidnimo. Waana in ay noqdaan qoysas degan oo leh hoy munaasib ku ah in uu daboolo baadhida korinta/daryeelka ilmaha ama dhalinyarada.

Maxay yihiin sababaha loogu baahanyahay waalidka sida ku-meel gaadhka u koriya carruur iyo dhalinyaro uusan dhalin?

- Daayac
- Ku-xadgudub
- Qoys rabshadaysan
- Waalidiin dhibaataysan

Maxaa ka mid ah waxyaabaha lagu kaalmeeyo waalidiinta loo xilsaaray in ay daryeelaan carruurta iyo dhalinyarada?

- Waxa loo celiyaa kharashka nolosha ilmaha ama dhalinyarada kaga baxa
- Waxa la siiyaa tababar lacag la'aan ah
- Waxaa loo diyaariyaa telefoon 24ka saacadood uu wici karo iyo kaalmo kale oo badan

Sideen ku noqon karaa waalid si ku-meel gaadh ah u daryeela carruurta iyo dhalinyarada?

1. Soo wac (613) 742-1620 ama siyaaro website kan www.fosteradoptwinningkids.com ama www.casott.on.ca.
2. Ka qeyb qaado habeen macluumaad la isweydaarsanayo
3. Buuxi arji

Heya'dda Daryeelka Caruurta ee Ottawa (613) 747-7800

Maxay tahay korsashada ilmo aanad dhalin?

Korsashada ilmo aanad dhalin waa ku soo biirinta ilmo ama dhalin qoyskaaga si rasmi ah, adiga oo u ogolaanaya in ay sharciyan qoyskaaga ka mid noqon doonaan . Inta badan carrurta ama dhalinyarada u baahan in la korsado waa qaar looga soo qaaday qoysaskooga ku-xadgudub iyo daayacnaan awgeed.

Ayaa korsan kara ilmo aanu dhalin?

- Dad u diyaar ah in ay hagarla'aan ilmaha ama dhalinta u daryeelaan noloshooda oo dhan
- Dad ka socda dhaqammada, midabada, iyo jinsiyadaha oo dhan
- Qoys lammaane ah, qof kali ah, qof la furay ama wax furay, qof laga dhintay, qofka jinsigiisa la galmooda; kuwaasoo da'da 19 jir ugu yar yahay
- Dad dhaqaale ama awood u leh in ay ilmo ama dhalinyaro aanay dhalin ku soo biiriyaan qoyskooda
- Dad aan dambi hore lahayn oo ka xanibi kara in loo ogolaado in ay ilmo korsan karaan

Waa kuwee caruurtaasi iyo dhalinyaradaasi?

- Carruurta iyo dhalinyarada loo qorsheeyey waa kuwa da'doodu tahay 0-16 sanno
- Waxay HDC marwalba u baahantahay qoysaska u diyaar ah in ay korsadaan carruur ama dhalinyaro 5 sanno ama ka weyn, carruur walaalaha ah, iyo kuwa korsiimadoodu dib u dhacsantahay

Waa maxay habka loo maro korsashada ilmo aanad dhalin?

1. Fiiri HDC website www.fosteradoptwinningkids.com ama wac (613) 742-1620.
2. Ka qeybgal kulan wargelin ah si aad wax badan uga ogaatid korsiimada ilmaha ama dhaliyarada aanad dhalin ee sugsaya hoy qaabila.
3. Ka qeybgal tababarka khasabka ah ee HDC oo socda ilaa 20 saacadood, ee xooga saaraya arrimaha ilmo korsashada rasmiga ah iyo ta ku-meel geedhka ah.
4. Buuxi arji oo ku soo celi Ottawa HDC/Adeegyada Korsashada.

Heya'dda Daryeelka Caruurta ee Ottawa (613) 747-7800

Noqo tabaruce

Ayaa noqon kara tabaruce?

Tabarucayaashu waa dad ka socda beesha oo go'aansaday in ay ku deeqaan wakhtigooda, tamartooda iyo xirfadahooda. Waxa weeyi rag iyo dumar ka weyn 18 jir, oo ka kooban arday, shaqaale, iyo dad hool-gab ah oo ka kala socda dhaqammo, diimo, iyo jinsiyado kala duwan. Tabarucayashayadu waa kuwa daneeya daryeelida carruurta ama dhalinta.

Waa maxay kaalinta tabarucuhu?

Waxaad ka qeyb-qaadan kartaa adeegyo badan. Kaalinta tabarucaha waxaa ka mid ah:

- Ka caawinta waxbarashada carruurta iyo dhalinta ku jira daryeelka
- In ay u noqdaan hogaamiye carruurta iyo dhalinta daryeelka ku jira
- In ay noqdaan ka qeybgalayaal kooxaha carruurta
- In ay noqdaan ka qeybgalayaal barnaamijyada anfaca carruurta iyo walidiintooda
- In ay noqdaan dirawalo hubiya in ay carruurta iyo dhalintu nabadgelyo ku gaadhaan balamadooda
- In ay noqdaan karaaniyiin ama kaaliyeyaal maamul
- In ay ka mid noqdaan xubnaha gudiga

Waa maxay xirfadaha iyo wakhtiga tabarucidu u baahantahay?

Xirfado gaar ah looma baahna, hase-yeeshee, waxaan ku dadaalnaa inaan is-waafajino waxaad xiiseyneyso, wakhtiga aad heysatid, xirfadahaaga iyo fursada tabarucida ee ugu fiican . Fursadaha tabarucidu waa joogto ama waa

mar mar. HDC waxay sameysaa jadwal macquul ah oo waafaqsan firaaqadaada iyo hawlahaaga kale.

Sideen u noqon kara tabaruce?
Hadii aad jeceshahay inaad noqotid tabaruce oo aad rabtid inaad ka qeyb-gashid kulankayaga warbixinta ah, fadlan kala soo xidhiidh/xiriir HDC:

Adeegyada Tabarucida:
Heya'dda Daryeelka Carrurta
602 Telesat Court
Gloucester,ON, K1B 1B1
Tel: 747-7800, extension 2805

Heya'dda Daryeelka Carruurta ee Ottawa (613) 747-7800

Goormaa warbixin laga dhiibaa ku-xadgudubka?

Waxaynu dhamaan mas'uul ka nahay inaan ka ilaalino carruurta iyo dhalinyarada wax yeello. Mas'uuliyadaasi waxa ay ina saarantahay goorta ilmaha ama dhalinyardu ku-xadgudub ama daayacnaan ay kala kulmaan qoysaskooda. Heya'dda Taageeridda Ilmaha iyo qoyska ee Ontario(CFSA) ayaa carruurta ugu deeqda nabadgelyo.

Waa ayo "ilmaha ama dhalinta u baahan nabadgelyo"?
Ilmaha u baahan nabadgelyo waa ilmo ama dhalin ku sugan ama qarka u saaran ku-xagudub ama/ iyo daayacnaan.

Ayaa ka mas'uul ah inuu ka warbixiyo ilmo ama dhalinyaro nabadgelyo u baahan?
Qof kasta oo sabab macquul ah ku tuhma in ilmo ama dhalinyaro ay u baahanyihiin ama ay u baahan karaan nabadgelyo, waa inuu sida ugu dhakhso badan u soo gaadhsiiyaa HDC macluumaadkaas.

Waa maxay "sababaha ugu haboon" ee aad ku tuhmi kartid ku-xadgudub ama daayacnaan?
Khasab maaha inaad hubtid in ilmuhu u baahanyahay badbaadin si aad u wargelisid HDC. "Sababaha macquulka ihi" waxay tilmaamayaan qofku isaga oo ka daacada ah, inuu go'aansado inuu ka warbixiyo wixii uu tuhmay

Waa da'dee ilmaha ay tahay in aynu ka warbixino?
Mas'uuliyadda warbixintu waxay khusaysaa ilmaha ah ama u eg inuu ka yaryahay 16 sanno. Waxa kale oo ay saameysaa carruurta ay maxkamadi amar ka bixisay oo ah 16 ama 17 sanno.

Ma isku halayn karaa in uu jawaabo ama ka warbixiyo qof kale?
Maya. Adigu waa inaad toos warbixinta u siisa HDC. Ha adeegsan qof kale inuu warbixin bixiyo isaga oo kaa wakiil ah.

Maxaa dhaca marka aad la soo xiriirto/xidhiidhido HDC?
HDC waxay ku sameyndoontaa baadhitaan warbixinta aad siisid. Shaqalaha HDC waxay u xilsaaranyhiin amarna ku heystaan in ay baadhaan tuhumada si ay u badbaadiyaan nabadgalyada carruurta. Shaqaaluhu waxa laga yaabaa, iyada oo ay ka mid tahay baadhitaanka ama qorshaha nabadgalyada ilmaha in ay wargaliyaan boliska iyo heya'daha kale ee bulshada.

Heya'dda Daryeelka Carruurta ee Ottawa (613) 747-7800

"Hadii uu ilmahaagu ama dhaliyaradaadu ku jiraan gacanta Heya'dda"

Mararka qaarkood carruurta iyo dhalinyarada way ku adkaataa in ay ku nooladaan guryahooda. Ilmaha iyo dhalinyaradu waxay hoos yimaadan heya'dda marka waalidku ogolaado ama Xaakin Maxkamadeed uu amro.

Aad baa la iskugu taxalujiyaa in ilmaha la geeyo guri ku haboon jinsiyada, midabka, dhaqanka iyo diinta ilmaha. Heya'ddu waxay ku dadaashaa in ay ilmaha iyo dhalinyarada u dhiibto qaraabadooda mar kasta oo ay suurtagasho. Hadii ay taasi suurtoobiweydo waxa ay doorbidaan in ay u dhiibaan qoys si ku meel-gaadh ah u haya ilmaha. Heya'ddu waxay hore-u-marisaa had iyo jeer in ay ilmaha walaalaha ah meel wada geyso.

Shaqaale ka tirsan daryeelka carruurta ayaa kaala shaqeyndoona sidii loogu sameynlahaa qorshe daryeela ilmahaaga.

Hadii uusan Xaakin Maxkamadeed odhan waalidku ma arki karo, waxaa loo qorsheyaa kulano waalidiinta iyo ilmaha ama dhalinta ku jirta daryeelka.

Ujeedadayada ugu muhiimsani waa inaan ku dadaalno sidii aan ugu soo celin lahayn carruurta qoyskooda. Qorshe adeeg oo ku wajahan ujeedadaas ayaa laguu sameyndoonaa. Hadiise loo arko in xaaladdu aad khatar u tahay oo aan ilmuhu nabadgalyo ku heli-karin guriga, qorshe rasmi ah ayaa loo sameyn, waxaana la hor dhigi Xaakin ka tirsan Maxkamada Qoyska.

Heyada Ururka Daryeelka Carruurta ee Ottawa (613) 747-7800

Goorma ayay Heya'dda Daryeelka Carruurtu soo dhexgashaa?

Heya'dda Daryeelka carruurtu (HDC) waxay u haysataa awood sharci ah in ay isku taxalujiso meelihii lagama marmaan ah in laga badbaadsho carruurta ku-xadqudubka iyo daayaca. Waxaan ku aqbalnaa taleefan (623 747-7800) warbixinta ku sabaabsan badbaadinta carruurta iyo dhalinyarada 24ka saacadood todobada maalmood ee sitimaanka.

HDC waxay faragelisa qoyska mark ay shiki ama war taxadir lehi oo ku saabsan ilmo ama dhalin na soo gaadho. Dhibaatooyinka carruurta gaadha waxaa ka mid ah ilmo wax la yeeley, ama khatar ku jira in wax la yeelo, markaa waxaa lagama marmaan ah in si degdeg ah looga hortago si loo badbaadiyo ilmaha.

Marka war na soo gaadho, qof shaqaale ah iyo kormeere ayaa falanqeeya khatarta ilmuhu ku suganyahay; iyo sida ku haboon ee loogu gurmanayo. Baadhista wararku waxay kaalmeysaa sidii go'aan loo gaadhi lahaa si loo badbaadiyo ilmaha, qoyskana loogu fidiyo caawimo.

Hadii warbixintu ay sheegayso in ilmaha dhaawac gaadhay ama halis uu ku jiro, HDC degdeg bay ugu gurmataa. Xaaladaha kale oo dhan qof shaqaale ah ayaa siyaarta qoyska toddoba maalmood gudahood.

Mar haddan soo dhexgalinno arrimaha qoyska iyo ilmaha, waxaan wad shaqeyn la yeelanaa qoyska iyo adeegyada bulshada kale si aan uga caawino qoyska wixii mashaakil ah ee soo waajaha. Waxaan u fidinaa adeegyo tabaruc ah oo joogto ah. Xaaladaha halista ah waxaa adeegyada lagu fidiyaa amarka Maxkamadda.

Waalid ama ilmo si toos ah ayay noola soo xidhiidhi/xiriiri karaan. Qaraabada, saaxiibka, macalinka, kal-kaaliyaha caafimaadaka, takhtarka ama aqoonyahankuba waa in ay noo soo gudbiyaan hadii ay u baqaan nabadgalyada iyo caafimaadka ilmaha iyo dhalinyarada.

Heya,dda Daryeelka Carruurta ee Ottawa (613) 747-7800

Waa maxay ku-xadgudubka iyo daayicidda ilmuhu?

Ku-xadgudubka iyo daayicidda ilmaha ama dhalinyaradu waxay dhacaan marka ilmaha loola dhaqmo si dhibaato ku keeni karta. Dhibaatadaasi waxay noqon kartaa mid wax yeesha jidhka, dareenka, maanka ama maskaxda iyo xidhiidhka/cilaaqaadka dadka lala yeesho, taasoo si aan fiicneyn u saameyn karta korista iyo hanka ilmaha. Ku-xadgudubku waa wax mararka qaar dhici kara mar mar ama laba jeer, ama wakhti badan dhaca muddo

dheer. Raadka ku-xadgudubku wuxuu socon karaa sannado, xataa marka ku-xadgudubka iyo daayiciddu istaagaan, mararka uu aad u xunyahayna wuxuu keeni karaa dhimasho. Kuwa hoos ku qorani waa afarta nooc ee u-xadgudubka iyo daayicidda:

Ku-xadgudubka jidhku waa marka uu qof garaaco ilmo ama dhalinyaro taas oo jidhkooda dhibaato u geysata sida jarid, nabarro, daliigo, laf dilaac, gubasho iyo dhaawacyo gudaha ah.

Ku-xadgudubka galmada waa marka qof ilmaha ama dhalinyarada ka weyni uu u isticmaalo ujeeddo galmood ah. Waxaa ka mid ah kufsashada, isku qaawinta iyo taabashada xubnaha galmada si ujeeddo galmood leh.

Ku-xadgudubka shucuurtu waa marka uu qof ilmo ama dhalinyaro ula dhaqmo si qalafsan isaga oo marwalba ku qaylinaya, cabsi galinaya, hoos u dhigaya, jidh diidaya, yareysanaya, cedleynaya ama ku dheel-dheelaya shucuurtooda, taas oo keeni karta in ilmaha ama dhalinyarda hankoodu hoos ku dhaco.

Daayiciddu waxay timaadaa marka ilmaha ama dhalinyarada baahiyahooda asaasiga ah la dobooli waayo. Baahiyahaa waxaa ka mid ah cuntada, hurdada, nabadgalyada, ilaalinta, huga, nadaafadda iyo daaweynta. Daayiciddu waxay dhacdaa marka qofka ilmaha ama dhalinyarada ka mas'uul ihi uu ka soo bixi waayo mas'uulidyadiisa ama awood u waayo inuu ilmaha ama dhalinyarda daryeelo.

Maxaa u dhexeeya ku-xadgudubka iyo edbinta ilmaha?
Ku-xadgudubku wuxuu ilmaha ama dhalinyarada u geystaa dhibaatooyin aan loo baahneyn, wuxuuna dhaawacaa hankooda iyo caafimaadkooda; waxuuna ku abuuraa cabsi muddo dheer socota iyo in ay nacaan qofkii ku-xadgudbay. Hase-yeeshee, edbintu inkastoy dhib ku tahay ilmaha dareenkiisa muddo gaaban, waxay ilmaha u hagtaa in ay si fiican u koraan, hankooduna kor u qaadmo, waxna ma yeesho jidhkooda, shucuurtooda, maankooda iyo cilaaqaadka ay dadka la leeyihiin. Taasi waxay ugu danbeynta ilmaha iyo dhalinyarada dhaxalsiisaa ixtiraan iyo kal-gacal ay u hayaan qofkii edbiyey.

Heya'dda Daryeelka Carruurta ee Ottawa (613) 747-800